

Yeelashada Caanaha Markaad Dhasho Nuunne Dhicis ah

Nuunneyaasha dhasha iyaga oo aan sidkoodii u dhamaan waa in lagu hayo qeybta daryeelka dhallaanka. Caanaha hooyada waxa ay nuunnaha u yihiin cunto iyo daawo. Waxaa muhiim ah in ay hooyadu yeelato caano badan marka ay umusho sida ugu dhakhso badan. Hooyada nuujisa nuunnaha, caanaha ayaa sidaas ugu sii bata.



Saliinge ay ka buuxdo caano dambar ah



Nuunne caano dambar ah saliinge laga siinayo



Hooyo iska liseysa caano



Hooyo caano iska keeneysaa

Dhibcaha ugu horreeya ee caanaha hooyada ayaa la yiraahdaa "dambar"

- Dambarku wuxuu u soo baxaa si ah dhibco oo waa caano hurdi ah. Dambarka waxaa ku jira nafaqooyin gaar ah oo difaac u ah infakshan badan.
- Dad badan ayaa dambarka yiraahda "dareere dahab ah" sababtuna waa in ay yihiin nafaqo gaar ah.
- Waxaa la isticmaali karaa mashiinka caanaha lagu liso iyo gacmaha si loo soo bixiyo dambarka.
- Waa in dambarka loo soo saaro sida ugu dhakhso badan marka hooyadu umusho si nuunnaha loogu diyaariyo markuu u baahdo. Marka si dhakhso ah loo soo saaro, hooyadu caano badan ayey yeelanaysaa.
- Kalkaaliyeyaasha ayaa nuunnaha siin kara dambarka, xataa nuunnaha oo ah mid aad u yar oo aan wax lagu siin karin masaasad.

Sida loo yeesho caano badan

- Dhowr maalmood ka dib, caanaha ayaa is beddelaya. Waa dareere cad oo hooyadu caano badan ayey yeelan kartaa.
- Caanahaas badanaa waxay soo baxayaan 3 ilaa 5 maalmood ka dib marka nuunnuhu dhasho, ama mararka qaakood waa ay ka sii badan karaan marka ilmuhu yahay dhicis, ama ku dhasho qalliin, ama haddii hooyada la siiyo daawooyinka qaarkood ka hor ama inta ay fooshu socoto.
- Caanahaas nuunnaha ayaa u baahan si uu ugu weynaado.

Immisa jeer ayaa caanaha la iska lisayaa?

- Waa in caanaha la iska liso 8 jeer 24-kii saac.
- Waa in habeenkii la iska liso caanaha. Waxaa fiican in saacad loo buuxsado si caanaha la isga liso.
- Maalmaha u horreeya waxaa caadi ah in la helo dhowr dhibcood oo ah dambar oo keliya. Xataa haddii aan la arkeyn caano badan, in wax badan la iska liso bilowga hore ayaa lagu heli karaa caano badan marka dambe.

Isticmaalidda gacanta

- Waxa kale oo caano lagu heli karaa in naasaha lagu tuujiyo gacmaha iyada oo caanaha toos loogu shubayo koob yar.
- Gacanta in lagu soo saaro caano waa in la sameeyo marka la umulo.
- Gacanta in lagu soo saaro caano waxaa la sameyn karaa iyadoo la iska lisayo caanaha si caano badan loo helo.

Sidee baa caanaha loogu helaa gacanta ama mashiinka?

- La-taliyeyaasha nuujinta (waa xirfadleyaal tababar ku haysta caawinta hooyada nuujineysa nuunneheeda) ama kalkaaliyeyaasha ayaa laga baran karaa sida loo isticmaalo mashiinka iyo gacanta.
- Waxaa sidoo kale hooyada caawin kara qoyska iyo asxaabta.